Heli

Tilmaansiiyaha Ururka Neefsashada ee Heli ry

Qaaxada

Qaaxadu waa cudur sidee ah?

– Qaaxadu waa cudur la is qaadsiiyo oo ay keento bakteeriyada la yiraahdo Mycobacterium tuberculosis, inta badanna cudurka qaaxada waxaa lagu arkaa sambabada.

Cudurka qaaxadu sidoo kale wuu ku dhici karaa meelaha kale ee jirka sida qanjidhada, lafaha, xubnaha kaadida iyo taranka, xubnaha uur ku jirta, xarunta maskaxda ee dareemada, maqaarka ama iyadoo infakshan guud ahaaneed ah bay qofka ku dhici kartaa.

Cudurka qaaxadu weli adduunka oo dhan wuu ka jiraa. Qaaxadu waxay sannad walba ku dhacdaa sideed malyan oo qof, waxaana u dhinta laba malyan oo qof. Qaaxadu waxay ku badan tahay waddamada faqiirka ah ee dadkoodu badan yihiin ee uu cudurka faafa ee HIV ka jiro. Ruushka iyo waddamada Baltika dadka cudurka qaaxadu ku dhacay way labanlaameen sannadihii 1990-yadii.

Finland waxaa sannad walba qaaxada laga helaa qiyaastii 300 oo qof oo hor leh.

Tiradaasna marka shan meelood loo qaybiyo qiyaastii hal qayb waa dad asalkoodu ajnebi yahay. Dadka asalkoodu ajnebiga yahay qaybta ay ku leeyihiin dadka qaaxada laga helaa way sii korodhay sannadahan dambe. Dadka asalkoodu Finnishka yahay ee qaaxada laga helaa waxay u badan yihiin kooxo ah dad waayeel ah oo ay qaaxadu ku dhacday markay carruurta ahaayeen iyo dad ay mukhaadaraadku dhibaatooyinka ku hayaan iyo dad bulshada ka dhacay. Dadka qaaxada laga helo marka afar meelood loo qaybiyo in hal meel ka badan waxay joogaan magaalomadaxda iyo deegaankeeda. Taas macneheedu waa, cudurka qaaxadu ma dhammaan ee weli wuu jiraa oo waa cudr ay tahay in khatartiisa layska ilaaliyo.

Baaritaanka midabaynta xaakada waxaa ka muuqda bakteeriyada qaaxada oo sidii ulo oo kale ah.

Sidee baa loo qaadi karaa cudurka qaaxada?

– Qaaditaanka cudurka waxaa shardi u ah, inuu qofku joogo meel cudurka lagu qaadi karo

Qofku wuxuu cudurka qaaxada qaadi karaa, haddii uu meel gudaha ah la joogo qof qaba cudurka qaaxada oo ah nooca la isqaadsiiyo. Khatarta ugu weyn ee qaadida cudurka waxaa ku sugan dadka guriga kula nool qof cudurka qaba iyo dadka kale ee si kale ugu dhow qofka cudurka qaba, oo muddo dheer ay wax dhexmaraan. Haddii si dhif ah qofka cudurka ah loola kulmo, khatarta ah qaaditaanka cudurku aad bay u yar tahay.

Dadka qaaxada qaba oo caddad ahaan loo qiyaasay waddan waddan ahaan



Cudurka qaaxadu weli adduunka wuu ka jiraa, wuxuuna ugu badan yahay Afrika iyo Aasiya.

Sidee loo kala qaadaa cudurka qaaxada?

– Cudurka qaaxada waxaa lagu kala qaadaa hawada oo sidaasuu qof uga gudbaa oo qof kale ugu gudbaa.

Dadka qaaxada qaba kuligood ma wada aha dad cudurka laga qaadi karo. Cudurka waxaa faafiya dadka qaba nooca qaaxada ee ku dhacda jidadka neef mareenka, waxayna faafiyaa iyagoo bakteeriyada qaaxada keenta oo aad u badan hawada ku sii deynaya, markay qufacaan, ama hindhisaan, ama ay hadlayaan, amaba markay heesayaan. Qaaxada laguma kala qaado tusaale ahaan alaabta oo kale, ee qofku wuxuu gelayaa khatarta ah inuu cudurka qaado, markuu neefsado bakteeriyada hawada ku jirta oo ay sambabadiisa sidaas ku gaarto. Qaaxada si aad ah looma kala qaado sababtoo ah dadka khatarta qaaditaanka qaaxada la kulma marka saddex meelood loo qaybiyo qiyaastii hal qayb ahaan uun bay qaaxadu ku dhacdaa. Khatarta faafidda qaaxadu way yaraanaysaa, haddii qofka qaaxada qabaa si sax ah u qufaco oo aanu bakteeriyada faafin, uuna si dhakhso ah isu baaro oo uu tago meel cudurka lagaga daaweeyo. Haddii meelaha la joogjoogo ee gudaha ah si joogto ah loo layriyo waxaa aad u yaraanaya caddadka bakteeriyada ah ee hawada ku jira.

Sida saxda ah ee loo qufaco

- Dadka kale ha ku quficin.
- Markaad qufacayso ama hindhisayso safaleeti afka iyo sanka ku dabool. Haddii aadan safaleeti haysan, shaatigaaga gacantiisa xageeda sare ku qufac.
- Safaleetiga qashinka ku rid.
- Gacmaha iska dhaq ama isticimaal dareeraha gacmaha lagu nadiifiyo ee jeermiska dila.

Daneel, Efired, Lisafx, Mifilippo, Invictuss999/Dreamstime.com

Dadka cudurku ku faafo oo dhan ma jirradaan?

– Maya, dadka cudurku ku dhaco intooda badan weligood ma yeeshaan astaamaha cudurka.

Dadka caafimaadkooda aasaasiga ah fiican yahay ee cudurku ku dhaco qiyaas ahaan tobonkiiba hal mid baa qaaxada u jirrada mar ka mid ah muddada uu qofkaasi nool yahay. Dadka cudurka qaada intooda badan bakteeriyadu xaalad nasasho ahaan bay jirkooda ugu jirtaa (=infakshanka qaaxada ee latentti-ga ah), dadkaasna ma noqdaan dadka cudurka qaaxada oo aktif ah qaba.

Dadka aad khatarta ugu ah inuu cudurka qaaxadu ku dhaco waa carruurta yar yar, dadka waayeelka ah iyo dadka jirro darteed ama daawo ay isticimaalaan dareed ay unugyada difaaca ee jirkoodu liitaan. Cudurka HIV waa kan ugu daran ee sii kordhiya khatarta ah inay qofka ku dhacdo jirrada qaaxadu.

Waa maxay faa'iidada tallaalka BCG?

– Tallaalku carruurta yar yar buu cudurka ka difaacaa.

Tallaalka BCG wuxuu carruurta yar yar ka difaacaa cudurka noocyadiisa khatarta ah, sida qaaxada soo badanaysa iyo manajaytiska (aivokalvotulehdus). Laga soo bilaabo dayrtii 2006 Finland waxaa tallaalkan la tallaalaa carruurta ka midka ah kooxda ay khatarta u tahay inuu cudurku ku dhaco oo keliya. Tallaalka waxaa la siiyaa carruurta yar yar ee markaas dhalatay ee ehelkooda u dhow dartiis ay khatar noqon karto inuu cudurku ku dhaco.

Carruurta noocaas ah waa kuwa gurigooda uu ku nool yahay qof ka yimi waddamada ay qaaxadu ku badan tahay, ama kuwa uu gurigooda ku nool yahay qof ehelkooda ah uu cudurka qaaxadu hore ugu dhacay. Waxaa kaloo tallaalka la siiyaa carruurta da'doodu 7 sano ka yar tahay ee muddo sannad gudihiisa ah safar ku aadaya waddan cudurka qaaxadu ku badan yahay, haddii ay waddankaas joogayaan muddo bil ka badan.

Jyrki Luukkonen

Finland tallaalka ka hortagga qaaxada oo ah BCG waxaa la siiyaa carruurta ka tirsan kuwa ay khatar u tahay inuu cudurku ku dhaco.

Waa noocee astaamaha cudurka qaaxadu?

– Astaamaha cudurku mar walba si cad uma muuqdaan.

Sida caadiga ah astaamuhu si tartiib ah ayey u samaysmaan, waxaana dhici karta inay bilowga hore yar yihiin. Astaamaha ugu caadisan waa qufac qofka ku daba dheeraada iyo xaako. Qaaxada ku dhacda meelaha kale ee aan ahayn sambabada, astaamuhu sida caadiga ah waxay la xiriiraan xubintaas uu cudurku ka jiro.

Astaamaha qaaxada

- qufac daba dheeraada
- xaakooyin ama xaako dhiig leh
- kulayl qofka qabta
- qofka oo habeenkii dhidida
- tabarta guud oo hoos u dhacda
- daal
- caatoobid
- qanjidhada dhuunta dhinacyadeeda oo weynaada

Sidee loo ogaadaa qaaxada sambabada ku dhacda?

– Sawirka raajada iyo xaakada oo la baaro.

Baaritaannada ugu muhiimsan ee qaaxada lagu ogaadaa waa sawirka raajada ee sambabada iyo xaakada oo midabaynta qaaxada lagu sameeyo iyo iyadoo xaakada la abuurayo. Waxaa la ururiyaa saddex ah saamiga xaakada, baaritaanka midabaynta ayaana lagu ogaadaa, inuu cudurku yahay nooca la kala qaado. Jawaabta laba maalmood gudohood ayaa lagu ogaadaa. Baaritaanka ah abuuritaanka xaakada jawaabtiisu waxay diyaar ku noqotaa dhowr todobaad gudohood, sidaas ayaana lagu hubsadaa cudurka. Meelaha kale ee aan sambabada ahayn qaaxada ku dhacda iyadoo ku xiran meesha cudurka qabta ayaa waxaa lagu baaraa baaritaanka sawirraada iyo iyadoo saami laga qaadayo meesha bugta (nudda bugta). Inta badan waxaa loo baahdaa baaritaanno isbitaalka lagu sameeyo, si loo helo saamiyada la baarayo oo ku filan samaynta baaritaanka iyo si loo kala ogaado in cudurku qaaxo yahay iyo inuu cudur kale yahay.

Riitva Järvenpää, AKU sädediagnostiikan yksikkö, TAYS

Sawirka raajada ee sambabada waxaa ka muuqda isbeddellada qaaxadu keentay: sambabada dhinoocada sare waxaa ka muuqda moqor iyo isbeddelo ah dhibco xiriir ah oo cad cad.

Sidee loo daaweeyaa cudurka qaaxada?

– Daawooyin.

Qaaxada daawooyin baa lagaga bogsadaa. Daaweynta waxaa la sameeyaa iyadoo dhowr daawo la wada isticimaalo, daryeelkuna wuxuu sida caadiga ah qaataa 6 –12 bilood. Qofka qaba nooca qaaxada ee la kala qaado waxaa bilowga hore lagu daaweeyaa isbitaalka oo qol gaar ah oo karantiimo ah ayaa lagu hayaa. Khatarta ah inuu qofku cudurka faafin karo waxay baaba'daa celcelis ahaan laba ilaa saddex todobaad gudohood. Daaweynta qaaxadu waa mid si aad ah wax u tarta, haddii qofku daawooyinka loo qoray oo dhan uu sida joogta ah ee loogu talagalay loo qaato muddada daaweyntu socoto oo dhan.

Jyrki Luukkonen

Qaaxada waxaa lagu daaweeyaa 3 –5 daawo oo la wada isticimaalo.

Dadka ehelkayga ah miyay khatar u yihiin inuu cudurku ku dhaco?

– Jirrashadu waa suuragal.

Qofka cudurka qaaxadu hayso ehelkiisa iyo dadka uu ku dhexjiro (qoyskiisa, saaxiibadiisa, iskuulkiisa, meesha uu wax ka barto, shaqada iyo meelaha hiwaayadihiisa) dadkooda waa la ogaadaa iyadoo la waraysanayo, sababtoo ah dadkaas waxaa ku jiri kara qaar qudurku ku faafay ama waxaa ku jiri kara qofkii uu qofka jirran cudurka ka qaaday. Nidaamka sidan ah oo loo yaqaan soo ogaanshaha dadka qofka jirran ay wax dhexmareen waxaa lagu joojinayaa, in aanu cudurku sii faafin, waxaa haga oo sidaas dhigaya sharciga cudurada faafa. Qofka qaaxada laga helo dadka ehelkiisa ah iyo dadka uu ku dhexjiro waxaa loogu yeeraaa, inay rugta caafimaadka u yimaadaan baaritaan caafimaadka ah oo uu dhaxtar ku samaynayo iyo sawir raajada sambabada ah oo laga qaadayo. Carruurta waxaa lagu baaraa isbitaalka. Haddii baaritaannada lagu ogaado dad qaaxo ku dhacday, waxaa loo bilaabaa daawooyin. Carruurta iyo dadka unugyadooda difaacu daciifka yihiin waxaa la siiyaa daawo ka hortag ah. Dadka kale ee looga baqayo inay cudurka qaadaan, xaaladooda waa lala socdaa oo muddo 1-2 sano ah ayaa lixdii biloodba mar raajada sambabada laga qaadaa. Haddii wakhtiga u dhexeeya mararka raajada laga qaadaayo ama ka dib ay isku arkaan astaamo, waxaa loo baahan yahay inay iskood rugta caafimaadka u tagaan baaritaan.

Kharash miyaa laga bixiyaa daryeelka qaaxada?

– Daryeelku lacag la'aan buu u yahay qofka bukaanka ah.

Baaritaanadda qaaxada, daawooyinka, daryeelka isbitaalka uu qofku ku jiro iyo imaatinada uu qofku imaanayo ee xaaladiisa lagula soconayaa lacag la'aan bay u yihiin qofka jirrada qaba.

Adigu waxaad masuul ka tahay naftaada iyo ehelkaaga. Haddii aad ka shakido cudurka qaaxada waa inaad isbaartaa oo in lagu daaweeyo doonataa, ama qofka aad astaamaha ku aragto u dir inuu isa soo baaro oo isdaaweeyo!

Maszas/Dreamstime.com

Faahfaahin dheeraad ah:
www.filha.fi
www. heli.fi
www.thl.fi
www.stoptb.org
www.who.int/tb/en/

Aqoonyahanka tilmaansiiyahani waa Iiris Rajalahti.
Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa si wadajir ah loola sameeyey tilmaansiiyahan.

www.heli.fi

Heli

Hengitysliitto Heli
Oltermannintie 8, PL 40, 00621 Helsinki
020 757 5000, faksi 020 757 5100
info@heli.fi

Pieni Huone Oy/kirjapaino painos 10/2008